

**HESHIISKA IN LA JOOJIYO KA-SAARIDDA INTA LAGU HAWLAN YAHAY  
FURSADAHA DIB U BIXINTA MACQUULKA AH**

**Taariikhda** \_\_\_\_\_

**Magaca Dagganaha** \_\_\_\_\_

**Cinwaanka Jidka** \_\_\_\_\_

**Magaalada, Gobolka, Zip** \_\_\_\_\_

Ka hor inta aan la soo bandhigin heshiisnaan, Maamulaha Hantida/Milkiilaha waxaa laga rabaa in uu Dagganaha siiyo ogeysiis muddo 14-maalin in uu kaga baxo guriga bacdamaa uusan bixinin kirada, sida waafaqsan sharciga federaalka iyo/ama sharuudaha lacag bixinta ama siyaasadda u dagsan Magaalada balse waafaqay in uusan talaabo sharci ka qaadin dagganaha, ama uusan dagganaha ku dallicin khidmadaha soo-daahidda ama uusan xumaan u gelinin diiwaanka taasoo la xariirta kirada aan la bixinin, sida ku saleysan waxa soo socda:

**1. Dagganaha Wuxuu si Buuxdo u Bixin Doonaa Kirada Socoto**

Dagganaha wuxuu bixin doonaa kirada/isticmaalka iyo dagganaashada isaga/iyada **iminka ku socoto oo ah \$ \_\_\_\_\_/bil kasta** taasoo leyska rabo maalinta 5<sup>aad</sup> bil kasta, laga bilaabo bisha kaddib marka warqadaan la saxiixo. Haddii milkiilaha uu dhexda kaga jiro dib u shahaadeynta sannadka, iyo aaminsan yahay in kirada hoos u dhici doonto, waxaa dhici karto in gadaal loo dhigo taariikhda lacag bixinta ilaa Milkiilaha uu Dagganaha ka siiyo ogeysiis qoran oo ku saabsan inta ay ahaan doonto xisaabta cusub.

**2. Dagganaha Wuxuu Dalban Doonaa Brograamyada Kaalmada Maaliyadda si uu u Buuxiyo Baaqiga Laga Rabo**

Dagganaha wuxuu dalban doonaa iyo wuxuu bixin doonaa macluumaadka hadba sida loogu baahdo brograam kasta oo ku saabsan kaalmada kirada oo dagganaha ku kaalmeeya in uu bixiyo **baaqiga harray, oo iminka lagu xisaabay \$ \_\_\_\_\_/bil kasta**. Milkiilaha Hantida wuxuu wada shaqeyn ka geysan doonaa bixinta macluumaadka noocaas iyo fullinta foomamka noocaas hadba sida lagama maarmaanka ah si loo helo lacag bixinta kirada aruurtay. Hase ahaatee, lacag bixinta waxaa la waafajin doonaa kharashka aruuray iyadoo aan meel la saarin dagganaasho cusub ama aan meesha laga saarin xaqa Milkiilaha Hantida u leeyahay in uu ku dhaqaaqo ka-saaridda guriga haddii dagganaha uusan awoodin in uu si buuxdo u bixiy baaqiga, isu geeyo maaliyadda u gaarka ah Dagganaha iyo kaalmada laga yaabo in Dagganaha uu ka helo ilo kale.

### **3. Haddii Dagganaha Uusan Dalbanin Kaalmada Maaliyadda muddo 30 maalin gudahooda, Xisaabta Dib u Bixinta Waa Kordhi Doontaa**

Haddii, muddada 30ka maalin gudahooda, kaddib marka la saxiixo heshiiskan, Dagganaha uusan helin ballan qaadka kaalmada si uu u bixiyo baaqiga harray, kaddibna laga bilaabo bisha marka 30ka maalin dhamaato, Dagganaha wuxuu bixin doonaa \$ \_\_\_\_\_/bil kasta taasoo la xariirta baaqiga harray. Xisaabinta noocaas kama badnaan doonto boqolkiiba 10% dakhliga leysku celceliyay ee soo gala dagganaha. Waa la baddali doonaa xisaabtan haddii dakhliga Dagganaha uu hoos u dhaco boqolkiiba 10% ama ka badan. Qodobkaan ma saamayn doono xaq Dagganaha u leeyahay kaalmada kirada laga helo brograamyada, ama waajibka Dagganaha iyo Maamulaha Hantida ka saaran in ay kala shaqeyaan bixinta macluumaadka noocaas ee laga yaabo in loo baahan yahay si loo helo ogolaashada lacag bixinta kaalmada kirada.

### **4. Milkiilaha Hantida Wuxuu Waafaqsan Yahay in uu Warqadaha laga Codsado Siiyo Dhamaan Ururada Kaalmada Maaliyadda ee Iskudaya in ay Dib u Bixiyaan Baaqiga**

Milkiilaha hantida wuxuu la shaqeyn doonaa Dagganaha iyo brograam kasta ama wakaalad bixisa kaalmada maaliyadda siisa Dagganaha si loo ogaado haddii baaqiga la qabo sida habboon loo xisaabo iyo haddii Dagganaha sida habboon loo tixgeliyay lacagaha uu bixiyay. Milkiilaha hantida waa in laga heli karo xisaabaad la fahmi karo iyo macluumaadka la xariira xisaabaadka hadba sidaloogu baahdo. Waxaa la fahamsan yahay in marmar in xisaabinta kirada ama arrimaha ku saabsan isku celcelinta lagala hadlo wakaalad qaabilsan kabidda aan ahayn Milkiilaha Hantida, balse Milkiilaha Hantida waafaqsan yahay in uu kala shaqeeyo dadaalka loogu jiro in macluumaad laga helo wakaaladda kabidda. Milkiilaha Hantida wuxuu waafaqsan yahay in leysku celceliyo baaqiga hadba sida loo loogu baahdo si loogu hoggaansamo sharciyada brograamka ama sharuudaha kirada, iyo in si sax ah loo muujiyo lacag bixinta dagganaha ama isku celcelinta kabidda.

### **5. Heshiiskan Ma Reebaayo in Dib Loo Wada Xaajooda Taasoo ku Saleysan Sheegashooyinka Dheeraadka ah**

Marka Dagganaha sheegto in ay jiraan sheegashooyin loo baahan yahay in tixgeliyo baaqiga la qabo (aan ahayn kuwa aan la xariirin kirada ama isku celcelinta kabidda ama soo celinta lacagaha), dhinacyada waxay ka wada xaajoon karaan dhimista baaqiga leyska rabo kaddibna laga dhafo sheegashooyinka noocaas. Dhinacyada waxay isticmaali karaan Waaxda Ku-Takhasusta Guriyeynta (Housing Specialist Department) ee Maxkamadda Guriyeynta (Housing Court) haddii ay waxtar u leedahay si xal looga gaaro sheegashooyinka noocaas.

**6. Milkiilaha Hantida Wuxuu ku Dhaqaaqi Karaa Habka Dadajinta Hirgelinta Sharciga Haddii Dagganaha Uusan u Hoggaansamin Muddo 60 Maalin Gudahooda**

Haddii ay caddaato, muddo 60 maalin gudahooda laga bilaabo marka la fulliyo heshiiskan, in Dagganaha uusan la shaqeynin bixinta macluumaadka loo baahan yahay xagga kaalmada kirada aruurtay, iyo/ama uusan bixinin kharashka ku baxa isticmaalka socda iyo dagganaashada iyo lacag bixinta ku aruurtay hadba sida loogu baahdo sida hoos timaado Baragraafka 3aad, ama xattaa haddii ay jirto wada shaqeynta Dagganaha iyo dadaalka loogu jiro lacag bixinta, aysan u muuqan doonin in baaqiga haray la buuxin doono muddo macquul ah ugu yaraan [redacted] bil, kaddibna Maamulaha Hantida wuxuu xor u noqon doonaa in uu dacwad ku soo oogo Dagganaha. Hase ahaatee, Dagganaha wuxuu isku difaaci karaa iyo wuxuu soo jeedin karaa sheegashooyin la xariira talaabadaas, kaddibna dhinacyada waxay sii wadi karaan in ay sahmiyaan, iyadoo adeegsanaayo dhexdhexaadin, haddii ay jirto qaab loo xalliyo oo dhallin kara badbaadinta dagganaashada oo ku saleysan qodob macquul ah una badan in labada dhinac ku kulmaan.

**7. Waxaa Dhici Karto in Dagganaha la Xariiro Xafiiska Sugidda Guriyeynta Boston (Boston Office of Housing Stability) si uu helo Kaalmo Dheeraad ah (Additional Assistance)**

Haddii Dagganaha aaminsan yahay in Milkiilaha Hantida aan laga helin wada shaqeyn xagga bixinta macluumaadka ama foomamka loo baahan yahay ee la xariira kaalmada kirada aruurtay, ama uusan kala shaqeynin sida habboon oo leysugu celceliyo baaqiga ama waajibaadka hoos yimaada heshiiskan, Dagganaha wuxuu kaalmo ka raadsan karaa Xafiiska Sugidda Guriyeynta (Office of Housing Stability), iyo Maamulaha Hantida wuxuu waafaqsan yahay in uu si daacad ah u qaabilo wakiilada Xafiiska si loo xalliyo arrimaha noocaas. Sidoo kale, OHS waxay dhinacyada ku kaalmeyn kartaa helitaanka ama adeegyada iyaga ku kaalmeyn kara in ay isku xeraan arrimaha hoos yimaada heshiiska.

**8. Ma jiraan wax ku jiro Heshiiskan oo saamayn kara xuquuqda dhinacyada in ay raadsadaan sharciga ama kaalmada maamulka la xariira arrimaha kale ee hoos yimaada dagganaashada.**

Dagganaha [redacted]

Milkiilaha Hantida [redacted]